Dhambaalka
البريد
AKADEMIYAHA DHAQANKA اكاديمية للدراسات الصومالية

AKADEMIYAHA DHAQANKA - Waddada J. C. Naasir - S. B. 1228 - Tel. 2440 - Xamar ٢٤٤٠ ت. ١٢٢٨ ص. ب. شارع جمال عبدالناصر

Taariikh Seb. 1975

Lam. 5

# TUSMADA DHAMBAALKA

HIRGELINTA HIDDAHA & DHAQANKA........................1
SHEEKO XARIIRO GAABAN.............................4
JIILAALLADA SIKIBAN SUUD UUN BAA XIGI!............5
ISKAA WAX U QABSO.................................10
BISHA KACAANKA DUNIDA "OKTOOBAR"...................12

P. O. Box 1228

Qiimaha Sh.So. 0,50

## DHAMBAALKA AKADEMIYAHA

Dhambaalka Akademiyaha Dhaqanku waa Wargeys Bille ah oo baara arrimaha Afka, Suugaanta, Dhaqanka iyo Hiddaha Soomaaliyeed, Tacliinta, IWM.

Dadweynuhu wuxuu awood u leeyahay inuu ku qorto "Dhambaalka Akademiyaha" ra'yigii kasta ee hufan, qeexan oo dhisme iyo horumarba leh.

Dhambaal Bille ah, waxa soo saara:
AKADEEMIYAHA DHAQANKU,
S.B. 1228, Tel. 2440, Muqdisho.

# HIRGELINTA HIDDAHA & DHAQANKA

WQ: Cumar Cabdi Xergeeye

Hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed waa hodan, gumeystayaashuna waxay xabaalayeen boqolaal sannadood. Hase yeeshee way u suurto geliweydey in ay ka tirtiraan maskaxda ummaddeena, sababta oo ah; Soomaalidu waxay hodan ka tahay xagga garashada iyo ku hal adaygga (hal adkaanta) dhaqankooda.

Boqolaal sannadood ayuu gaaxday dhaqanka Soomaaliyeed oo uu u baahnaa in la hirgeliyo, lagana qaado mugdigii ay ku qoofaleen gumeystayaashu. Ummaddeennuna, muddo dheer bay u baahnaayeen qorista afkooda hooyo; Taas oo aabbe u ah hirgelinta dhaqankeenna.

Gumeystayaashu aqoon dheer bay u lahaayeen, in ummadda Soomaaliyeed ay hodan ka tahay cilmiyada saameeya dhaqanka kood ah; laakiin, waxay ku dadaaleen inay daboolaan oo aanu soo if bixin.

Bishii Oktoobar 21dii 1969kii, Soomaaliya waxaa ka curtay + Kacaan. Kacaankaas oo u dhashay daryeelidda danaha ummadda Soomaaliyeed.

Bishii Oktoobar 21dii 1972dii, Kacaanku wuxuu shaaca ka qaaday oo uu ku dhawaaqay in la qoro afkeenna hooyo; si loogaga xoroobo dhibaatadii afafka qalaad loona soo nooleeyo dhaqankeennii dacdarraystay.

Barashadii afkeenna hooyo, waxay kaga hirgashay magaalooyinka jumhuuriyadda oo dhan muddo aad u gaaban. waxaa kaloo olole lagu qaaday, sidii dadweynaha miyiga loo bari lahaa qorista afka; taas oo u hirgashay sidii la doonaayay lagana gaadhay guul taariikhda Binu-Aadmiga heer sare ka gashay.

Kacaanku wuxuu ururiyey dad Soomaaliyeed oo Abwaanno ku ah, dhanka afka, hiddaha iyo dhaqankeennaba (Guddiga Af Soomaaliga) kuwaas oo aqoon dheer u leh qorista runta ah, ee saamaysa Suugaanta, Taariikhda Soomaaliyeed iyo baadhista afka intaba.

Sannadkii 1973dii, Kacaanku wuxuu magacaabay Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, iyadoo ay ujeeddadu tahay in la taabbogaliyo Hiddaha iyo Dhaqanka korna loo soo qaado aqoonta ummadda Soomaaliyeed.

Isla markaa waxaa la unkay waax ka mid ah Wasaaradda oo la yiraahdo "Akadeemiyaha Dhaqanka"Soomaaliyeed" taas oo unkay in ay noqoto goobtii hirgelinta dhaqanka Soomaaliyeed, ahna xarunta Abwaannada ku xeesha dheer Hiddaha iyo Dhaqankeenna (Guddiga Af Soomaaliga)iyo goobta dadweynaha lagaga ururiyo cilmiyada ku saabsan dhaqanka.

Berigii hore, dhallinyarada Soomaaliyeed waxay baran jireen Suugaanta iyo Taariikhda shisheeyaha. Sidaa awgeed, maanta ma uu jiro qof Jaamacad ka soo baxay oo shahaado ku sita Hiddaha iyo Dhaqanka Soomaaliyeed. Waayo? sababtu waxaa weeye, Kacaanka intii ka horreysey oo aanay cidi tixgalinjirin Hiddaha iyo Dhaqanka kuween ah. Weligi ha jiro eh, Kacaankii Oktoobar ayaa soo warraaqiyey, soo fufiyey ama soo if saaray iyagoo abaadilahaa waana xay nool maanta.

Haddaba qofkii isku dayaya,in uu qoro buug ku saabsan cilmiyada kor ku xusan waxaa habboon in uu aqoon u leeyahay wixii uu qoraayo oo uu yahay qof baadhayay muddo dheer. Sababta oo ah cilmigu wuxuu ku dhex jiraa dadweynaha waayo aragga ah, waana in laga dhex dayo.

Dadka da'doodu weyn tahay, waxaa hubaal ah inay aqoon u leeyihiin Dhaqanka Ummadda Soomaaliyeed. Maxaa yeelay? waxay jireen intii gumeystayaasha iyo dhaqammada shisheeyuhu ayna soo galin dalkeenna ama waxayba soo gaadheen dadkii iyaga ka sii horreeyay ee Dhaqankeenna ku xeesha dheeraa.

Wiilka geel jirka ah ama gabadha adhi jirta ahi, mid kastaba ha ahaadee wuxuu qori karaa buugaag si cilmi ah ugu qodtoma Hiddaha iyo Dhaqanka Soomaaliyeed, waa haddii ay bartaan qorista afkeenna hooyo. Waayo? Dhaqankeenna ayay kaga wanaagsan yihiin wiilka ama gabadha reer magaalka ah, waxaa kaloo ay kaga wanaagsan yihiin macnaha afka; sababta oo ah haddee afkeenna iyo Dhaqankeennuba waxay ka soo abuurmeen miyiga.

Dhaqankeennu wuxuu u baahan yahay in la hirgeliyo mar haddii qof kasta oo Soomaali ahi miyi iyo magaalo midkuu doonaba ha joogee uu bartay qoristiisa oo uu ka adag yahay waxa uu garanhayo oo uu si qeexan u qoro.

Dhaqankeenna hirgelintiisu ma aha mid ku xiran shahaado sare kaliya ee waxay ku xirantahay qof waliba sida uu aqoon ugu leeyahay ama sida uu u baadhay ee uu uga sal gaadhay waxyaalaha uu doonayo in uu qoro.

## SHEEKO XARIIRO GAABAN

WQ: Cabdulqaadir Xuseen Maxamed

Waxaa la yiri beri baa, Libaax, Xoor iyo Dabangaalle, waxay u soo ciyaar doonteen Dawoco. Libaax, Xoor iyo Dabangaalle, waxay kolba geed ka kor dhacaan oo ay soo guure qabaxsadaanba, goor / cawaysin dambe ah ayay yimaaddeen rugtii Dawacada. Dabadeedna kambalkoodii(duleedkii) ayay ciyaar ka qabsadeen; markay ciyaartii cag iyo jaan isugu dhacday ayay dawacadii loo soo ciyaar guday is haysan kari wayday oo bowdka ka soo dhacday, oo waxay badhtanka isugu tuurtay ciyaartii oo socota markaasay luuqdii wax ka lalisay.

Raggii rag ahaa! Libaax, Xoor iyo Dabangaalle, seddexdooduba waxay ahaayeen dhallinyaro guur u meer ah oo uu mid waluba gaarkiisa ugu talo jiro, in ay dawacadu isaga raacdo.

Libaax, Xoor iyo Dabangaalle, wuxuu midkoodba goonidiisa isugu dayay, in uu xirrib iyo xoolo wixii uu haysto u bandhigo dawacada uguna faano si ay isu tiraahdo: Allaa i lehe kanaa ma dhaafaankii ah. Haddaba waakan Libaaxii ayaa soo booday! wuxuuna yiri:

Kayn baan inoo gali oo Koran baan inoo dili oo
Kuruskaan inoo jari oo Dayooy ma i dooranaysaa?

Xoorkii baa soo booday oo wuxuu yiri:

Dundun baan inoo gali oo Malabkaan ka dawdabi oo
Dayooy ma i dooranaysaa?

Dabangaallihii ayaa isna markiisii soo booday oo yiri:

Anigaan gu' iyo(Dayr)Jiilaal geelaygu gamashiyin
oo ummushaydu gaajoon ee Dayooy ma i dooranaysaa?

Kolkii uu seddexdoodii mid waliba wuxuu oran lahaa yiri, ayay iyadii hadashay oo ay isku dayday in ay tartanka ku kala reebto nimanka. Waxayna tiri:

Dabangaalle Qoodheedaw Qummanow ina Ugaasow
Adigaan Ku Qaayibay!

Gabadhii Dawaco' ahayd halkaas ayay ku raacday ninkii Dabangaalle ahaa, sidaasuuna tartankii ugu adkaaday.

## JIILAALLADA SIKIBAN SUUD UUN BAA XIGI

(Gabay: Cabdi Sheekh Biixi)

Faalleeye: Cumar Aw Nuux.

Markii ay Soomaaliya abaartii kululayd ku barraahsatay ayuu Cabdi Sheekh Biixi, wuxuu maqlay dad sheekaysanaya oo is leh; abaarta waxaa iyo waxaas ayaa keenay, haddana haddii aynu sidan iyo sideer yeello roobku wuu inoo di'i lahaa.

Dadkaas hawlaha Kacaanka iyo ummuuraha Ilaahay is waafaq-siinaya lana oran karo dadkaasu waa dib u socodka la sheego markii uu Cabdi maqlay ayuu Gabaygan ugu jawaabay wuxuuna yiri:-

SAMEEYAHA ALLAHA SAATIREE DUNI SULDAANKEED AH
CIRKA EEBBIHII SOOGAY EE NAGU DUL SAYNSAABAY
XIDDIGAHA SUNSUMA IYO DAYAXA SAATIRKA U YEELAY
ALLAHAA CADCEEDDANA SUDHEE MILICDA SOO SAARAY
EE MAALIN SAACIYO HABEYN NOOGU KALA SOOCAY
DHULKA EEBBIHII SUUBBIYEE DHOOBO NAGA SAAFAY
EE DHEEFTA NAGA SIIYAY IYO SEEKASHA HOYGA
SAAB IYO CALOOL IYO ALLIHII GEEDDO KALA SAARAY
SALKA IYO ILAAHII KALYAHA SINO HAREER JOOJAY
SAMBABKA IYO BEERKA IYO WADNAHA SEEDIMIYO JIIDHKA
SAANTIYO SANSAANKIIYO GACMAHA SUURADDIYO JAAHA
ALLIHII GARBAHA SAA YIDHEE LUQUN KU SAAMEELAY
SULLUXSANE GADH WAA LABADA DAAN MEEL SALDHO AHAYD
ALLIHII SAGOOYADA DABNAHA CAMAN KU SEETEEYAY
ALLIHII IIKAHA SAQAF KA DHIGAY RAAMIYAHA SAADKA
SUBAGLAHA DHADHAMIYIYO ALLIHII SIINADDA U YEELAY
LABA SUGAYA KII SIQ AH ALLAHA MARIYAY EEN SEEJIN
SANQADH MAQALKA EEBBIHI DHAGAHA NAGU SABAALEEYEY
ALLIHII INDHAHA NOO SAREE ARAGTI SUUREEYAY
DHAKO SEEMMAN EEBBIHI SURRADEE TIMO KU SOORYEEYEY
QALBI SAXAN SIFAALAHA MASKAXU SUGANTI FAALLOOTO
SAMAATADIYO EEBBIHI NA YIDHI XUMAHA SAANYOODA
IIMAANKA ALLIHII NOO SUGEE GARASHO NOO SIIYAY
SANKA NEEF ILAAHII GASHEE RUUXA SOCODSIIYEY

SAWJAD IYO ALLIHII SAY KA DHIGAY EE ILMANA SIIYAY
SUUBBANOW RASUULKIYO ALLIHII SUURADAHA KEENAY
SIDUU DOONO MOOYEE WAX KALE SUURO GALI WAAYE
WAXAA SAABKA DUNIDA U TASHADA SAATIRKAY QUDH E
ISAGAA SAREEDIYO KA DHIGAY SOLAN CADAABEEDE
ISAGAA SALLEELIDA KU YIDHI WAABA JAAH SIDO E
SAXAN SAXO UDGOON BAYS XIGIYO OON U SAAQURANE
SI KASTABA ILAAHAY XAMDIGA FARAL INOO SAARYE
SAMIRKIYO SUBXAANKOON BARYAA WAA SAD II MAQANE
DOOBIR SAMO SACAADIYO NASIIB SIBIR INTAAN LAABO
AAN SARAADSHO SAY NOQON HADDII EEBBE SOLANSIIYO.
SAHA DHACAY SADAADAHA WAKHTIGA SULUF ABAAREEDKA
SEDDEX BOQOL XERYAHA SARA MAREE CAYDHA IAGU SAADO
SADKA HODAN SABOOL KALA SINMIYO SUXAL DIRAACEEDKA
ISASUDHAN SOKEEYIYO XIGAAL DAN ISU SEEGGOODA
SUMMADDEEDU SOOMAALI WAA SOOFKA XOOLAHA E
SAC KOLAY KU TAHAY MAALKA AAN CIDINA SII HAYNIN
SABI AAN HAB LAGU SEEKIYIYO BADHAX LA SIINAYNIN
SIBRAARADA QALLALAY HAAMAHAA GOROF SABAANOOBAY
SAXARIIR MARYAADKIYO LURTIYO SUUDIGIYO QIIQA
CIIDDA SOLAN DHIRTAA SOOGAN IYO DOGOBBADAA SUUQMAY
DALKA SAXAR WADAAMEED LA'IYO CAWSKA LAGA SUUSHAY
SARYANKIYO LIBAAXYADA SURMIYAY SIIGGA IYO CAWSHA
BICIIDKAA SURSUURAHA GALIYO GOODIRRADA SOOHMAY
MAROODIGA SADAADAYSAN IYO GARIYADII SOOLKA
SALLAX CEELASHAA WADA NOQDIYO SABO MADHNAANTOODA
SAMADAA KOR LOO EEGAYIYO WABIYADAA SOOMAN
CIRKA SAGAL DARUUR SAHANSHA IYO SAYNKA LA GA WAAYAY
SIDA DAD U ARKIYO XAAJO WAY KALA SOKEEYAANE
XILLIGAYNA SEEJAYE ALLUHU WAA SIDII HORE'E.
SUBRADA IYO CIRJIIDHAA SIDKAMAY URUR SALAANKOODA
DIBQALLOOCYADAA SII SOCDIYO DIRIRKA SEERAARSHAY
AFAGAALLADAA SEEXDAY IYO SACO IRMAAN SHEEGGA

SOOBIR GAGAN LAXAHA SAARAN IYO DUCAY SANSAANKEEDE
SAYDHTANKAA CADAAD XAYNLIHIYO SUGGA CUDAAR MUUJAY
ARBACADA SALLAADDIDA KORTIYO SADARRADAY JEEXDAY
SIDA AY AL-JULUS LEEDIHIYO SUBAX KHAMIISEEDKA
SABTIDA IYO AXADDA ISA SUGAY SAMO HESHIISKOODA
SALAASADA ISNIIN SAACIDDIYO NABAD SURMAYNTOODA
QUDBIGAA KU SARE JOOGSADEE SAANTAY XARAMAYNKA
SALAADDAA JAMCEE LAGU TUKADAY SUBUCYADII DIINTA
ROOBDOON SIDII LA ARKI JIREY SEEGITIIN MA LEHE
SAADAAL XIDDIGINTAYDU WAA SANO BARWAAQAADE
SAAKANA GU'GII AAN SIDKADAY SOOBIR IYO LAACA
RI' SEENYOON NIN LIHI MAALINTUU SAYDHI JIRAY CIIRTA
IN SIDDEETAN GUURADU TAHAAN SUDHAY TILMAANTIIYE
HA LA SUGO JIILAALLADAN SIKIBAN SUUD UUN BAA XIGIYE.

Cabdi Sheekh Biixi, halkaas ayuu gabaygii ku joojiyay isaga oo leh: xilliga uun baa inu seejiyay laakiin Ilaahay wali waa sidiisii, isla markaana saadaashii ku tilmaamaya, in ay nimcadii Eebbe cidhifka inagu soo hayso.

Haddaba, waa sidii uu hore u sheegayey oo xilligii uu is beddelay oo roob aan xaddi lahayn ayaa xagga Alle laga helay.

Dhibaatadii dadka Soomaaliyeed ku soo fool yeelatay Ilaahay wuu fududeeyay, ummaddii abaaraha ku caydhowdayna si habsami ah ayaa loogu birmaday loona dajiyey. Dabadeedna Cabdi, gabaygii ayuu halkii uu markii hore ku dhammeeyay uun haddana hore uga bilaabay oo wuxuu yiri:

"HA LA SUGO JIILAALLADA SIKIBAN SUUD UUN BAA XIGIYE"
WAATAAN INSHAARADII SAKIMAY SAA AHAYD SHALAYE
INTUU GU'GU SIDIISII ONKODAY HARO MA SAAMEELAY?
MA SAYNSAABTAY DOOMAAR BALLIDU RAHU MA SOOYAAMAY?
SAAR IYO DHALOOL IYO ARLADU XAMASH MA SOO SAARTAY?
SOOHDINTII SHABEELLIYO JUBBOO SI U KARAAR DHAAFAY
SUUBAAN WARAABAY IYO DOOX CAGAF MA SEERAARSHAY?

SABAANKII XUMAA REERUHUU MADHIYAY SOOFKOODA
DADKII AAN SAGAALKII BILOOD XERO KU SAADEYNEY
HADBA SUXALKU WAA QOLO NABSINA BEEL MA SAACIDO E
MARKAAN DUNIDA BAAQ UGU SAWAXEE LAYGA WADA SEEXDAY
INTAAN TABARADAYDA U SIKADAY DALAB MARKAAN SAARAY
INAAN CAYDHA SOO RARO MARKAY IGAGA SEERRAATAY
JAAN GOOYO AAN SUGAY MARKAY TALADU SAAMEESHAY
NINKAY DANU KA SARANSEERISEE SOCOD AWOOD WAAYA
SOKEEYIYO WUXUU KALA GARTAA SOGORDOH LAAYAANE
GAADIID CELISKII SOOFIYEET MARKII GACANTA LAY SAARAY
IYO WALIBA SAAD IYO SANCIYO SUUFAF IYO DAAWO
SOOMAALIDU MARKAY UMASHAY EEY SOCOD HABEYNEYSEY
MARKII AY SALLIGA WADA QABTEEN SAMAYDA KAYNAANKA
SAAB IYO HANGOOL IYO UBBIYO SAAMO IYO XEEDHO
SATI IYO QABAAL IYO TABADO UDUB SALOOG DHEER AH
SURRAD IYO XAMAAMIYO BIRQALAX SOOFE IYO DHIILAL
IYO ADHIGII SAYMAHA KU LUMAY TOBAN SALAAFAAYA
INTAAN SOOL BANNAAN WADA TUBOON SABI XANNAANEEYAY
DADKII OO HALKII SOOGAN OO SUGAYA AWR GAALLO
DAYUURADO SAMAYSKII DALBE AH KABADDA MAW SAARAY?
SALOOGNAANTA GEEDDIGII LA YIDHI WAY KU SARANSEERI
LABA SANO SARGOOYADII AHAYD TOLOW MA SUUROOBI
SODDON IYO LIX MAALMOOD GURYAHA MAWGU SALABEEYEY?
KURTUNWAARRAY SEERIGAN DHAW EE SOOLKA BADEHEENNA
TUJUMMIYO SABLAALUU KU FURAY SAHANKII KHAYRAADE
SAF KALLUUN JILLAABTOO DUNIDA SAHAYDA GAADHSIIYA
IYO QAAR ASLAAXYADA SANDAHAN MIDHO KA SOO SAARA
SAA INTAAN DEGMADA UGU SIKIBAY CUDUDNA MAW SIIYAY?
SUD BARWAAQO SEERAAR NIMCO AH XAMASHLE SUUGAAN AH
INTA AAN SAREEDO U HUBSADAY SUXAL MA KAYNAANAY?
SALKA KAYDKA NOLOSHOODU SOW SARE AHAAN MAYSO?
ANOO SUGAYA KII IGA SAFTEE GACANTA SEERAARSHAY

EE YIDHI SURQUUN HAW DHIINTEEN SAHI MA BEENOOBAY?
MIDKII CAYDH LA SAXARIIRAYEE SOOMMANAA SHALAYTO
IN ADDUUNKU DHEEFAAL KA SUGI SUGANTI SOW MAAHA?
SOKEEYIYO XIGAAL IYO NINKII GARASHO SUURAYSTAY
SUMMAD RAACA SEEDDIYO ABTIYO SADO QABIIL SHEEGTAY
SEEGGANAHA ALLAA SAA KA DHIGAY SAHIIS AQOONEEDE
SUULKII UU KADA QAYBIN JIRAY WAA SURKAA QUDHAHE
IN ABTIRISKU SOOMAALI YAHAY SAAKA MA OGAADAY?

# ISKAA WAX U QABSO

WQ: Shire Jaamac Axmed

Dalka Soomaalida waxaa laga yaqiin iskaa wax u qabso, run ahaanse waxaa la dhaqan geliyey Tawraddii Oktoobar markii ay ka dhalatay dalkeenna 1969kii. Iskaa wax u qabso, waa arrinta kaliya ee dhulku horay ugu kici karo. Iyadu waxay dadka u keentaa isku kalsooni iyo naftiisa oo uu wax u qabsado, isaga oon ka sugin kaalmo dadkale ama shisheeye. Hantiwadaagnimadu waxay ku dhisan tahay in wadajir iyo kalsami wax loo qabsado, taas oo ku imanaysa iskaa wax u qabso.

Dadkii isku kalsooni waxay dhisan karaan ilbaxnimo xoog leh ee aan ku dhisnayn musuqmaasuq iyo afmiinshaarnimo. Iskaa wax u qabso, waxaa weeye "adigu naftaada taageer adiga oon u cuskan kaalmo dadyow kale aad ka heshid." Dadkii iskiis wax u qabsadaa taariikhda, ayuu meel wanaagsan ka galaa.

Dadka Soomaalidu Tawraddii Oktoobar ka dib, wuxuu dhistay waxyaalo badan oo uu ku dhistay iskaa wax u qabso. Shan sano gudahood, ayaa dadkeennu ku muujiyey, inuu isagu wax naftiisa u qabsan karo, kana deeqtoonaan karo gumeysigu dawarsigii uu nala rabay. Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanku, Jaalle: Maxamed Siyaad Barre, wuxuu ku dhawaaqay Kacaankii Oktoobar ka dib, in uusan dalkeennu tallaabo meel kasta ka qaadi karin, isaga oo isku kalsoonaada mooyee.

Hantiwadaagnimadu waxay ku dhisan tahay shaqo, wadajir, isku kalsoonaan iyo iskaa wax u qabso. Shaqadu waa waxa kaliya oo dadyowga is dhaafin kara. Dadkii shaqada jeclaadaa oo iskiis wax u qabsadaa, isaga keliya ayaa guul heli kara. Gumeysiga iyo gumeysiga cusubi dadyowga waxay ka qaadaan isku kalsoonaanta iyo inay naftooda wax u qabsadaan. Talada iskaa wax u qabso, hadda ka hor sidaan soo sheegnayba dadkeennu wuu ku dhaqmi jirey. Taasna waxaa cadday-naya dhaqankeennii iyo hiddeheennii oo ku dhisnaan jirey kuna dhisan isku kalsoonaan iyo iskaa wax u qabso. Maahmaahda Soomaaliduna waxay leedahay:

# BISHA KACAANKA DUNIDA "OKTOOBAR"

WQ: Cabdi Sheekh Biixi Aadan.

Waxaan jeclahay, in aan is baro dadweynaha Soomaaliyeed iyo bishooda Oktoobar ah.

Walaallayaal, bisha Oktoobar waxay ahaan jirtey bisha siddeedaad ee sannadka dadkii horee reer Rumaan. reer Rumaan, oo sannadkoodu ka bilaabmi jirey bisha Maarso; marka sanada Maarso laga soo bilaabana Oktoobar waxay noqonaysay bisha siddeedaad ee sannadka.

Sannadkan aynu innagu tirsanno ee loo yaqaanno Yurubyaan Kileendarka wuxuu ka bilaabmaa bisha Jannaayo, Oktoobarna waxay noqotaa bisha tobnaad ee sannadka hadda aan innagu tirsanno.

Dadkii hore ee reer Rumaan, badanaaba markay Ducaysanayaan, marka ay Duulayaan, marka ay ilmo u dhashay u magac bixinayaan, marka ay Sadcaalayaan iyo markay cid boqranayaanba ka fursanwaa nooyaane waxay caadaysan jireen, in ay ku beegaan bisha Oktoobar. arrimahooduna samaantay ugu talo galeen ayuun bay ugu dhammaan jireen. sidaa darteed, ayay ugu baxsheen, bishii cawada iyo ayaanka "Oktoobar".

Bisha Oktoobar, waxay maalinba heer joogtoba. qarnigii labaatanaad horraantiisii ayay kar ku soo celisey Adduunweynaha iyadoo dhimbiilo wadata. waxaana jirey Kacaanno iyo ururro faro badan oo wada dhashay bisha Oktoobar, marka aan ka soo qaadno:

Kacaankii 25tii Oktoobar 1917dii ee dalka Ururka Midowga Soofiyeeti.
Kacaankii 1dii Oktoobar 1949kii ee dalka Shiinaha.
Kacaankii 7dii Oktoobar 1949kii ee dalka Jarmalka Bariga.
Kacaankii 14tii Oktoobar 1969kii ee dalka Yamanta Koonfureed.
Maalintii 24tii Oktoobar 1949kii ee Ururka Qaramada Midoobay.
Maalintii 12dii Oktoobar 1944tii ee uu Calankeennu soo if baxay.
Kacaankii 24tii Oktoobar 1945tii ee ay labadii urur ee dhallinyarada iyo xisbigii shaqaalaha ee Jarmalka Barigu kaga adkaadeen hantigoosadkii dalkooda.

Waxaaba isna jira, dalka Yugoslaafiya oo isagu dhawr maalmood ka xusa bisha Oktoobar. maalmahaas oo kala ah.

11da Oktoobar oo ah maalinta uu dadka gobolka Macedonia uu xuso.

7da Oktoobar oo ah maalinta la dhisay Madaafiicda Goobta ee -- Xoogga dalka ee dadka Yugoslaafiya.

20ka Oktoobar oo ah maalintii la xoreeyay Magaalo Madaxdooda.

24ta Oktoobar oo ah maalinta Ururka Qarammada Midoobay.

Intaas aan kor ku soo sheegay,oo kacaan ah markii loogu marag furay in ay Oktoobar wada dhasheen. horena ay dadkii reer Rumaan u-gu bixiyeen bishii cawada iyo ayaanka, ayaannu annana ugu wanqallay bishii Kacaanka ee adduunweynaha.

Haddaba, waxaynu SAGALKA, MAYAYGA iyo HILLAACEEDA bidhaansanna-ba Oktoobar waxay Soomaaliya daruurta ka kala ridday heegadana soo saartay 1969kii habaynkii ay 21da ahayd.

Waxay hufada iyo dabaysha baallaha nagala dhacdaba, 3dii saac ee habaynnimo ayuu mahiigaankii Oktoobar ku habsaday Soomaaliya.

9kii saac ee subaxnimo, waxay doonaartu kor sabbaynaysay! galgalimuhuna way wadhnaayeen.

Rayskii Oktoobar, ayaa sayaxiisii dhulku soo tufay saaka! Madheedhkii caleentu waa hamash, Midhuhu baallahay ka guduuteen. Hohobtu way gahaydhay, markii inta la laba gacmoodiyo oo la hufo masafaha lagu wadhi lahaa ayaa cidhifka ina soo saaray.

Kacaan kasta, oo dhasha bisha Oktoobar, wuxuu u baahdaa cid taageero iyo siisa tabantaabo. hase yeeshee, Kacaan dhasha bisha Oktoobar oo ciddа in ay is hortaagto damacdaa ayna dhib iyo guul-darro labada qoob galinnin wali laguma hayo taariikhda dunida. dig-niintuna waxay tahay in la yidhaahdo: cid alle ciddii damacsanaay ha ku luggu'in.